

Codsiga Sheegashada Todobaadlaha Oregon ee Caymiska Shaqo la'aanta Joogtada ah

Foomkan waa beddelka Frances Online (frances.oregon.gov) iyo Xarunta Xiriirka UI (800-982-8920). Isticmaal foomkan oo kaliya haddii aadan awoodin inaad isticmaasho Frances.

Foomkan waxaa loogu talagalay shakhsiyaadka go'aamiyay u-qalmiitaanka caymiska shaqo la'aanta caadiga ah oo raba inay xereeyaan warbixintooda toddobaadlaha ah. Haddii aadan haysan sheegasho la aasaasay, waa inaad marka hore xeraysataa codsiga dheefaha caymiska shaqo la'aanta ee caadiga ah. Buuxi foomkan si aad u dalbato dheefaha todobaadlaha ah oo aad jeclaan lahayd inaad codsato dheefaha caymiska shaqo la'aanta ee joogtada ah. Waxaad u baahnaan doontaa inaad buuxiso foom gaar ah toddobaad kasta. Fadlan isticmaal magacaaga hadda ku jira faylka Maamulka Lambarka Bulshada..

MACLUUMAADKA SHEEGASHADA

Magaca koowaad:	Magaca dhexel:	Magaca dambe:
-----------------	----------------	---------------

Lambarka Aqoonsiga Macmiilka ama Lambarka Bulshada:

Su'aalaha soo socdaa waxay khuseeyaan oo kaliya todobaadka aad buuxinayso Waa inaad toddobaad kasta soo sheegtaa hawlahaaga shaqo raadinta. Si laguugu tixgeliyo inaad si firfircoon u raadsato shaqo, waa inaad dhammaystirtaa ugu yaraan shan hawlood shaqo raadis todobaad kasta oo aad dheefaha codsato. Ugu yaraan laba ka mid ah hawlaha shaqo-raadinta ee aad dhammayso toddobaad kasta waa inay ahaadaan xiriir toos ah oo lala yeesho loo-shaqeeyayaasha. Calaamadee sanduuqa shaqo la'aanta ku meel gaadhka ah kaliya haddii loo-shaqeeyahaagu kaa filayo inaad shaqada ku soo noqoto afar toddobaad gudahooda ee maalinta ugu dambeysa ee shaqada. Inaad si khalidan u saxdo sanduuqa shaqo la'aanta ku meel gaadhka ah waxay dib u dhigi kartaa lacagtaada haddii loo-shaqeeyahaagu aanu filaynin inaad shaqada ku soo noqoto afar toddobaad gudahooda ee maalinta ugu dambeysa ee shaqada. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan sida loo xareeyo sheegashada toddobaadlaha ah ama goorta aad saxdo sanduuqa shaqo la'aanta ku meel gaadhka ah, nagala soo xiriir Frances. Wax ka baro siyaabaha kala duwan ee aad nagala soo xiriiri karto unemployment.oregon.gov/so/contact-us.

Week claimed (week dates beginning with Sunday and ending Saturday):

SOO BANDHIGIDA SHAQOYINKA IYO KALA SAARIDA

Miyaad ku guuldareysatay inaad aqbasho wax shaqo todobaadkii hore? ☐ Haa ☐ Maya

Makatagtay shaqo todobaadkii hore? ☐ Haa ☐ Maya

Hadii ay haa tahay, qor magacayada iyo ciwaannada loo shaqeeyaha:

Ma lagaa eryay shaqo todobaadkii hore? ☐ Haa ☐ Maya

Hadii ay haa tahay, qor magacayada iyo ciwaannada loo shaqeeyaha:

Ma lagaa joojiyay shaqo todobaadkii hore? ☐ Haa ☐ Maya

Hadii ay haa tahay, qor magacayada iyo ciwaannada loo shaqeeyaha:

AWOODA OO RABA INUU SHAQEYO

Miyaad ka maqnayd goobta aad degantahay ee rasmiga ah in ka badan saddex maalmood todobaadkii hore? ☐ Haa ☐ Maya

Ma awooday jir ahaan iyo maskax ahaanba inaad qabato shaqada aad raadsatay todobaadkii hore? ☐ Haa ☐ Maya

Maalin kasta todobaadkii hore, miyaad diyaar u ahayd inaad shaqeeyso oo aad awood ulahayd inaad aqbasho oo aad ka warbixiso wakhti buuxa, wakhti dhiman, iyo Shaqo ku meel gaar ah? ☐ Haa ☐ Maya

SHAQO RAADIN

Si firfircoon ma u raadisay shaqo todobaadkii hore? ☐ Haa ☐ Maya

Miyaad shaqeysay todobaadkii hore, mise ma heshay, mise waxaad heli doontaa, fasax ama lacag fasax toddobaadle ah? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii aad shaqeysay todobaadkii hore, geli tirada saacadaha aad shaqeysay (qiyaastii ilaa saacadda kuugu dhow)

Geli wadarta dakhligaaga guud ka hor inta aan la jarin (bixi cashuurta ka hor), xitaa haddii aan lagu siin: \$

Haddii aad mushaar ka qaadatay shaqada, qor magacyada loo shaqeeyaha iyo ciwaankooda:

Geli dakhliga fasaxa, ciidaha, ama dakhliga kale ka hor jarista, xitaa haddii aadan weli lagu siin: \$

Hadii aad heshay fasax, fasaxa ciida, ama dakhliga kale, qor magacyada iyo ciwaannada loo shaqeeyayaasha:

HAWLAHA SHAQO-RAADINTA

Fadlan qor magacyada loo-shaqeeyayaasha aad la xiriirtay shaqooyinka todobaadkii hore. Inta lagu jiro todobaad kasta oo aad sheeganeysa dheefaha, waxaa lagaa rabaa inaad si toos ah ula xiriirto ugu yaraan laba shaqo-bixiye oo aad leedahay wadarta guud ee shan hawlo shaqo raadin iyo xiriir shaqo. Ku guuldareysiga inaad bixiso shaqo raadintaada ama ku guuldareysiga inaad shaqo raadiso waxay keeni kartaa dib u dhac ama diidmo faa'iidooyinkaaga. Xiriir toos ah oo lala yeesho loo shaqeeyaha macneheedu waa in qof ahaan loola xiriirto loo shaqeeyaha, telefoon ahaan, boostada, ama qaab elektaroonig ah si aad wax uga waydiiso shaqo furan ama u codsato shaqo furan sida uu rabo loo shaqeeyaha. Hawlaha shaqo raadinta waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn: iska diiwaan gelinta adeegyada meelaynta shaqada ee WorkSource Oregon, ka qaybgalka shirarka meelaynta shaqada ee ay kafaalo qaado Waaxda Shaqaalaynta, ka qayb qaadashada naadi shaqo ama koox isku xidhan oo u heellan meelaynta shaqada, cusboonaysiinta resume, dib u eegista wargeyska ama shabakadaha meelaynta shaqada adoon ka jawaabin shaqo furan oo la soo dhejiyay, ama xidhiidh toos ah lala samayn loo shaqeeyaha.

Xiriirka tooska ah

Magaca Loo shaqeeyaha	Ciwaanka shaqada	Goobta	Taariikhda xiriirka	Habka xiriirka (qof ahaan, telefoon ahaan)	Natiijooyinka (la shaqaaleysiiyay, aan la ka shaqaalaysiin ,codsaday)

Taariikhda

Hawlaha kale ee shaqo raadinta

☐ Waxaan ahay xubin si fiican ugujira urur shaqaale oo aan ii ogolaanayn inaan raadsado shaqo aan urur ahayn oo ka dhex jirta ganacsigayga. Waxaan la xiriiray ururkayga, waxaan ku jiraa liiska shaqo la'aanta. Waxaan awooday inaan aqbaloo oo aan ka warbixiyo shaqada haddii ururkaygu ii soo diro. Waxaan fahamsanahay in jawaabaha beenta ah ay keeni karaan dheefo iyo ganaaxyo dheeraad ah oo ay tahay inaan dib u bixiyo.

Hadii aad hubisay inaad ka tirsantahay urur shaqaale, qor magaca ururkaaga iyo lambarkooda:

☐

Waxaan ahay shaqo la,aan si ku meel gaar ah sababtoo ah shaqada ayaa la iga saaray ama waxaa la iga dhimay saacadahii shaqada waxaana filayaa inaan ku soo noqdo shaqada loo-shaqeeyahayga. Waxaan ku soo laabanayaa shaqada waqti-buuxa ah ama shaqo bixisa wax ka badan qaddarkayga dheefaha toddobaadlaha ah. Ma jiraan wax ka badan afar (4) todobaad inta u dhaxaysa todobaad aan si ku meel gaar ah shaqo la'aan noqday iyo todobaad aan shaqada ku soo laabanayo. Waxaan la xiriiray cidda aan u shaqeeyo. Waxaan fahamsanahay in jawaabaha beenta ah ay keeni karaan dheefo iyo ganaaxyo dheeraad ah oo ay tahay inaan dib u bixiyo.

Haddii aad hubisay inaad si ku meel gaar ah shaqo u haysan, qor taariikhda aad filayso inaad shaqada ku soo noqoto:

XAQIIJINTA SHEEGASHADA

Waxaan caddaynayaa in jawaabahaygu yihiin kuwo run ah oo sax ah inta aqoontayda ah. Aniga ayaa mas'uul ka ah jawaabaha aan bixiyo. Jawaabaha beenta ah waxay keeni karaan dheefo dheeraad ah, oo ay tahay inaan dib u bixiyo. Haddii aan bixiyo xog aan ogahay inay been tahay ama marin habaabin ah, ama haddii aan qariyo macluumaadka, waxaa loo tixgaliyaa khiyaano waxaana lagu muteysan karaa ciqaab sharci. Waxaan fahamsanahay in samaynta cadeyntu ay hoos imaanayso ciqaabta been-abuurka iyo been-abuurka ula kac ah si aan u helo lacago aanan xaq u lahayn inaan qaato taas oo keeni karta in la igusoo oogo dacwad ciqaabeed.

☐ **WAXAAN OGOLAHAY BAYAANKA KOR KU XUSAN**

Saxiixa:

Taariikhda:

Ma u baahan tahay caawimaad?

Macluumaadkani waa mid aad u muhiim ah. Waaxda Shaqaalaynta ee Oregon (The Oregon Employment Department, OED) waa wakaalad leh fursad loo siman yahay. OED waxay ku siineysaa caawimo bilaash ah si aad u isticmaasho adeegyadeena. Tusaalooyinka qaarkood waa luqadda dhegoolaha iyo tarjumaannada luqada lagu hadlo, agab ku qoran afaf kale, far waaweyn, maqal iyo qaabab kale. Si aad caawimo u hesho, fadlan ku dhufo unemployment.oregon.gov/so oo guji Nala Soo xiriir ama naga soo wac 877-345-3484. Isticmaalayaasha TTY waca 711.

Fadlan ku soo gudbi codsigaaga oo dhamaystiran boostada ama fakis :

Boostada: Oregon Employment Department | P. O. Box 14135 | Salem, OR 97309-5068

Fakis: 866-345-1878